



Waa maxay College Bound?

Ardayda dugsiga sare: College Bound waa ballanqaad hore oo ah kaalmada dhaqaale ee gobolka, sida Washington College Grant, si ay kaaga caawiso bixinta waxbarashadaada ka dib dugsiga sare. Qadarka lacagta ay ardaydu helaan waxay ku salaysan tahay kharashka dhexdhexaadka ah ee waxbarashada (heerka kuleejyada dawlada), kharashyada qaar, iyo xaddi yar oo buugaagta ah. Waxa aad u isticmaali kartaa College Bound ka in ay kaa caawiso bixinta kharashka waxbarashadaada in ka badan 65 kuleejyada, jaamacadaha, iyo dugsiyada farsamada ku yaal Washigton qaybtana ka ah barnaamijkan.

Waa maxay balan-qaadku?

- Haddii aad damacsan tahay inaad gasho kuleej afar sano ah isla marka aad dugsiga sare ka baxdo, waa inaad ka qalinjabisaa dugsiga sare oo Washington ku yaal ama barnaamijka dugsiga guriga oo heshaa GPA (Grade Point Average, Celceliska Dhibcaha Darajada) isku-darka 2.0 ama ka wanaagsan.

Ma jiraan wax shuruudo GPA-ga dugsiga sare ahi haddii aad qorshaynayso inaad dhigato kuleej bulsho ama dugsiga farsamo.

- Codso kaalmada dhaqaale ee FAFSA (Free Application for Federal Student Aid, Codsiga bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka) ama WAFSA (Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Washington ee Gargaarka Dhaqaale ee Gobolka) sanadkaaga u danbeeya ee dugsiga sare iyo sannad kasta inta lagu jiro kuleejka ama tababarka.
- Waa inuusan gelin wax danbi ah.

2024-25 dakhliga dhexdhexaadka ah ee qoyska

Qoyska Tiradiisa	Dakhliga Sanadlaha ah*
1	\$40,500
2	\$53,000
3	\$65,500
4	\$78,500
5	\$91,000
6	\$103,500
7	\$105,500
8	\$108,000

*Qoyska dakhligiisu waa inuu ka yaraado ama u dhigmaa cadadkan.

Kadib qalin jebinta, sidee ayaan ku helayaa College Bound?

- Buuxi shuruudaha College Bound iyo shuruudaha degenaanshaha gobolka.
- Waa inaad iska diiwaan gelisaa kuleej sanad gudihiis marka aad hesho shahaadada dugsiga sare.
- Waa in aad sumcad wanaagsan ku leeday kuleejkaaga.
- Codso kaalmada dhaqaale sannad kasta oo aad kuleejka ku jirto.
- Buuxi shuruudaha dakhliga ee shaxda dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah. Kuleejkaaga ayaa go'aansan doona in aad buuxisay shuruudaha dakhliga.

Muxuu College Bound iga doonayaa?

- Xaqiiji in College Bound hayo xogtaada xariirka oo sax ah.
- Waydii lataliyaha dugsigaaga sare si aad u xaqiijiso inaad ku taagantahay tubta xaqiijinaysa inaad buuxiso shuruudaha balan-qaadka.
- U diyaar garoow inaad kuleej raadsato adoo eegaaya liiska dugsiyada u qalma ood ka helayso webseedka College Bound oo ah wsac.wa.gov/sfa-institutions.

Ma u baahan tahay Caawimaad? Aalada fariin qoraalka ee Otter!

OtterBot waa adeeg qoraal ah oo taageera dhammaan ardayda dugsiga sare iyo waalidiintooda/masuuliyiintooda. Waxa loogu talagalay ardayda ku jira College Bound.



Isticmaal koodhkan QR ka si aad isaga diiwangaliso ama u cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka si aanu kula soo xiriiri karo! Kalaya waxa ay qadanaysaa hal minit!



College Bound waa barnaamij ay maalgaliso gobolku ayna maamulaan Washington Student Achievement Council.



Nagala soo xiriir

collegebound.wa.gov

collegebound@wsac.wa.gov

888.535.0747 (doorashada 1)